## Natiijooyinkii Soobaxay

Baaritaankaagii waxaa ka soo bixi doona mid ka mid ah natiijooyinka soo socda:

**La hantay** – Eedaynta waxaa caawiyay caddayn. Iyadoo la cuskanaayo darnaanta falka, natiijadii la hantay waxay keeni kartaa fal edbin ah.

**Aan La Hanan** – Waxaan jirin caddayn ku filan oo ama muujin karta eedeyntii ama aan muujin karin.

**Aan La helin** – Waxaan jirin caddayn caawinaysa eedeynta.

**Loo Dambi dhaafay** – Eedeyntu waa run, laakiin falka uu sameeyay shaqaaluhu baa sharciga waafaqsanaa kuna habboonaa xaaladda.

**Siyaasad/Hannaan** – Eedeyntu si cad bay ugu saabsanayd adeegsiga habboon ee siyaasadda Qeybta ee la ansixiyay.

**Sabab loo Joojiyay** – Dhaqanxumadii la sheegay may dhicin ama qofka lagu magacaabay sheegashada maahan shaqaale Qeyb.

**La Awoodin Waxkaqabasho** – Waxaan jirin xog ku filan si loo dhammaystiro baaritaanka.

## Ka-Garcelinta Natiijadii Sheegashadaada

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka ku saabsan sheegashadaada, waxaad xarayn kartaa garcelis adoo la xiriiraya Duq-Xigeenka shaqaalihii ku lug lahaa. Laxiriirka waa in la sameeyaa 14 maalmood gudahood laga soo bilaabo maalintii la helay warqadda natiijada. Warqadda waxaa ku xusnaan doona magaca iyo lanbarka taleefanka Duq-Xigeenka. Garcelintaadu waa inay sifaynaysaa xog kastoo dheeri ah oo aad hayso oo laga yaabo inay go'aanka Duq-Xigeenka beddesho.

## Sheegashooyin Beena

Qeybta Booliska waxaa ka go'an inay baarto arrimaha dhaqanxumada shaqaalaha. Qeybta Boolisku waxay ka garanaysaa in saraakiishu u noqon karaan yoolal dad sheekooyinkood beenabuura kuwaas oo iyaga la goobaya aargudasho shaqadooda ay samaynayaan awgeed. Afgaradka dib loo eegay ee Ohio wuxuu ka dhigaa dambi-fudud ee heerka kowaad in si ogaala loo xareeyo sheegasho dhaqanxumo oo beenabuur ah oo ka dhan ah sarkaal nabadeed. Qeybtu waxay dareemaysaa in dadku ogaado in sharcigu jiro markii ay habboon tahay, ganaax baa la xarayn doonaa ka dhan ku-jawrfalayaasha sharcigaan. Fadlan xusuusnow, maahan kaliya inay qaali tahay in la baaro sheegasho beenabuura, laakiin waxay kaloo sameynaysaa xilka sarkaalka. Xogtaan looma bixin in dadka laga joojiyo xaraynta sheegasheeyinka ee waa si loogu wargeliyo sharciga.

**Baaraha loo xilsaaray sheegashadaada waa:**

Baare: ______________________________

Taleefan/Cod-diris: ___________________

U-10.168 (11/16/2010)

# Qeybta Booliska Columbus, Ohio Ee Habka Sheegashada Dhaladka



## Hordhaca Habka Sheegashada

Qeybta Booliska ee Columbus waxaa ka go'an siinta adeeg tayo leh dhammaan dadka ku nool Magaalada Columbus.

Hawshayadu waxay saameysaa tayada nolosha ee bulshadeenna. Si aan tusno ballantayadii macquulnimo, dhammaan shaqaalaha waxaa lagu dhaariyay inay xajiyaan afgaradka dhaqammada ee Qeybta booliska, xeerar, siyaasado, tilmaamo, iyo amarro iyo sidoo kale dhammaan xeerarka fedaraalka, magaalo iyo dawlad oo la xiriira shaqosiintooda.

Habka sheegashada dhaladka waxaa loogu talagalay inuu dadka siiyo daw ay ku cabbiraan danahooda ku saabsan adeegga booliska. Habkaani wuxuu u abuuraa eegis ujeeddo leh, dhab ku salaysan oo macquula walaaca qofka.

**FIIROGAARA:** Ka sheegtayaasha sababta hoos ka xarriiqan ee ku saabsan tixraac booliswaddo ama u xabbisid dambi waa in lagu dhammeeyaa maxkamado mana aha in loo baaro sidii sheegasho ka dhan ah shaqaale Qeybta Booliska.

## Sidee Sheegasho loo Xareeyaa

Kowaad, go'aanso gefka aad u malaynayso in shaqaaluhu sameeyay. Tusaale ahaan, ma rumeysan tahay:

- Sarkaalku xoog tiro badan buu u adeegsaday qabashada?
- Shaqaaluhu wuxuu ahaa mid kuu xun adiga?
- Sarkaalku wuxuu ku xadgudbay xuquuqahaaga?
- Waxaad tahay dhibbane faquuq takooreed?

Sheegasheeyinka dhammaantood waa in lagu xareeryo 60 maalmood gudahood laga soo bilaabayo markii dhacdada, haddii aysan jirin xaalado gaar ahaaneed. Sheegasheeyinka la xareeyo isla markiiba waxay hagaajiyaan fursadda ah in baaruhu soo aruursho xog dhabta waafaqsan.

Si aad u xarayso sheegasho, kula xiriir Qeybta Booliska qaababka soo aaddan midkood:

- **Taleefan:** Wac (614) 645-4880, 24 Saac maalintii. Waxaad la hadli doontaa korjooge kaas oo eegi doona sheegashadaada. Haddii sheegashadaadu u baahan tahay jawaab markiiba ah si loo aruursho caddayn ama qiraallo markhaati, Arrimaha gudaha ama korjoogaha Qeybta waxaa loo diri doonaa meesha dhacdada.

- **Qof Ahaan:** Qof ahaan waxaad ku xarayn kartaa sheegashadaada 750 E. Long Street inta u dhaxaysa 7:00 AM iyo 9:00 PM maalin walba. Waxaad si toos ah ula hadli kartaa korjoogaha Arrimaha Gudaha ama waxaad buuxin kartaa xaashida (foomka) sheegashada dhaladka dalka.

- **Boostodiris/Fakis/Email:** Waxaad boostada ku diri kartaa sheegasho qoraal ah, fakis, ama email. Waxaa muhiim ah inaad ku darto magacaaga, cinwaanka, iyo lanbarka taleefanka si aan u awoodno inaan kaala soo xiriirno sheegashadaada.

  - Columbus Police Division
    Internal Affairs Bureau
    750 E. Long Street
    Columbus, OH 43203

  - Fakis: (614) 645-4079

  - Mareeg: www.columbuspolice.org

Markii la eego sheegashadaada, waxaa korjoogaha u suurtoobi karta inuu u sharraxo falalkii shaqaalaha si ku qancisa, ama uu kuu gudbiyo korjooge sidaas awooda. Haddii arrinku sidaan yahay, xaalka waa la xiri doonaa. Haddii sheegashadaadu u baahan tahay in la baaro, waxaa loo dhiibi doonaa baare kaas oo 72 saacadood gudahood kula soo xiriiri doona. Haddii aan lagula soo xiriirin 72 saacadood gudahood, fadlan wac (614) 645-4880 si aad u hubiso in baaruhu hayo xogta laxiriirkaaga oo saxan.

## Baaritaanka Sheegashadaada

Baaruhu wuxuu fulin doonaa baaritaan tafatiran ee dhacdada wuxuuna qiraallo ka aruurin doonaa adiga iyo markhaatiyaasha. Kaalmayntaada waa la filayaa xog dheeri ah in loo baahdana waa suurtogal. Haddii ay eedayntu halis tahay, waa suurtagal in lagu weydiiyo inaad marto baaritaan beenbaar (polygraph). Kan macnahiisu maahan in baaruhu u malaynayo inaad been sheegayso, laakiin wuxuu rabaa inuu sii hubiyo ka-runsheegga eedeyntaada.

Markii baaritaanku uu dhammaado, baaruhu wuxuu siin doonaa warbixin qoraala silsiladda taliska shaqaalihii ku lug lahaa. Soojeedinnadooda waxaa eegi doona Duq-Xigeenka wuxuuna isaga/iyadu go'aamin doonaan natiijada habboon.

## Natiijada Sheegashadaada

Waxaad ku heli doontaa boostada warqad sheegaysa natiijada sheegashadaada. Fadlan ogow in baaritaan la faahfaahiyay iyo eegitaanka dhabta ahi waqti qaadan karaan. Waxaa suurtogal ah inaan wax lagaa ogeysiin natiijada u dambaysa intii dhawr toddobaad ah. Haddii sheegashadu u baahan tahay baaritaan ballaaran, waxaaba dhici karta inay qaadato in ka badan. Baaruhu wuxuu wadi doonaa inuu kaaga soo warramo xaalka wuxuuna kula socodsiin doonaa wax kastoo dibudhacyo ah oo aan caadi ahayn. Baaritaannada badidood waxaa lagu dhammeeyaa 90 maalmood gudahood ka dib xaraynta sheegashada.

*(ku sii socda dhinaca kale)*